

Doorashada Hawlwadeenka Kantaroolka Cayayaanka Darran

Waxaa dhici karto in dhibaatooyinka qaar ee lagala kulmo doonliga ay aad u balaaran yaahin in la kantaroolo. Marka lala shaqeeyo shirkadda aqoonta kantaroolka cayayaanka si loo kantaroolo doonliga, caddee waxa aad rabtid in la sameeyo kaddibna la soco sida ay wax u qabtaan.

Aqoonyaanada kantaroolka cayayaanka darran

waxaa laga heli karaa buugga telefoonka iyo internetka. Weydii "maamulka midaynta cayayaanka darran" ("integrated pest management") ama adeegyada "IPM." Hababka IPM waxay badanaa isticmalaan sun yar iyo waxay adeegsadaan farsamo kale si loo kantaroolo cayayaanka. Shaqalaha kantaroolka cayayaanka darran waa in ay baaraan, la socdaan iyo soo jeediyaan talooyin looga reebaayo bahda doonliga. Wareyso shirkadaha kaddibna weydii tixraac, sida macaamiishii hore.


Weydii si aad u aragtid shattiyadooda.

Dhamaan shirkadaha waa in la siiyo shatti lagana diiwaan geliyo Waaxda Beeraha Gobolka Washington (Washington State Department of Agriculture) (WSDA). Sharciga cayayaan dishada Washington wuxuu rabaa in ganacsiyada ku shaqeeya cayayaan dishada in la siyo shattiga isticmaalaha Ganacsiga. Intaa waxaa dheer, dagmada King County, Caafimaadka Dadweynaha waxay shatti siiyaan Shaqaalaha Kantaroolka Cayayaanka Darran (Structural Pest Control Operators).

- Shatti bixinta Cayayaan Dishada WSDA (WSDA Pesticide Licensing) iyo shattiyada Fattashaha Cayayaan Dishada (Structural Pest Inspector) waxaa laga heli karaa internetka <http://agr.wa.gov/pestfert/licensing/search/>

Sida Leysaga Tuuro Doonliga Dhintay

- Waxaad doonliga dhintay ku duubtaa wargeys ama waxaad gelisaa bac blaastiig ah ka hor inta aadan gelnin qasaca qashinka oo si dhuuqsan loo xeray.
- **Waa in la dilo** doonliga dhaawacan ama xanuunsan, kaddibna la duubo lana geliyo qasaca qashinka.
- Gacmahaada oo qaawan ha ku qabanin doonli dhintay.
- Adeegso gacan gashad haddii ay suurtoagal tahay. Haddii aan la heli karin gacan gashad, isticmaal gudaha bacda ama badiil.



Kantaroolka Bahda Doonliga

Dabbinta loo dhigo bahda doonliga iyo meelaha la dhigo cantalaalka si ay u noqdaan kuwo shaqeeya, ka saar dhamaan ilaha raashinka.

- Dibadda ha ku dhaafin raashinka xoolaha ku nool guryaha ama miraha shimbirta.
- Ha ku shubin jajabka cuntada weelasha furan ee lagu shubo qashinka dibadda ee guriga. Istimaal weel daboolan sida toobinta cagaaran ee lagu shubo qashinka dibadda.
- Waxaad dhamaan qashinka ku sugtaa gudaha qasac dabool leh.
- Keydi raashinka xoolaha jooga guriga iyo raashinka kale ee laga yaabo in ay soo jiitaan doonliga ku keydisaa weelal aysan geli karin doonliga.

Public Health

Seattle & King County




Environmental Health Services
401 5th Ave, Suite 1100
Seattle, WA 98104

206-263-9566 www.kingcounty.gov/health/rats

Waxaa Lagu Heli Karaa Qaabab Kale

October 2018

KANTORAALKA BAHDA DOONLIGA



Sida loo isticmaalo dabbinta bahda doonliga iyo goobaha la dhigo cantalaalka

Sida loo Adeegsado Dabbinta Doonliga

CANTALAAL U DHIG!

Si loo qabto doonli, adeegso dabbinta doonliga. Dabbinta ugu fiican waa fududahay, looxa raqiiska "dabinta isqabsata." Waxay ku yimadaan labo cabbir, mid yar oo loogu talagalay doonliga yar iyo mid weyn oo loogu talagalay doonliga weyn. Haddii aad dabin u dhigeysid doonliga yaryar, waxaa dhici karto in ay shaqeyaan looxa leysku dhajiyayo.



DHIG KADDIBNA TOOSI DABBINTA!

Maxuu yahay cantalaalka ugu fiican?

Doonliga Yar - Subagga looska, rooti, sabiib, qansiir, marmalaata "strawberry."



Doonliga saqaafka - Subagga looska, subagga looska lagu qasay ceyriinka badarka "oatmeal", frutto saafi ah, nacnac jilicsan.

Doonliga Norway - Qansiir, jajabka hilibka, mallaay.

Waxaad cantalaalka ku dhajisaa dabbinta. Waxaa laga yaabaa in aad u baahatid in aad u baahatid in aad ku xertid birta fakata (isticmaal gabal xereg ama dun) si doonliga looga ilaaliyo in uu qaato. Ha gelinin cantalaal badan, isticmaal in ku filan oo soo jiita bahda doonliga.

Horay maqaalnta u dhg dabbinta Waxaad isticmaashaa dabbin aan la diyaarinin si bahda doonliga ula qabsato una barato. Samee tan muddo labo ama saddax saac, kaddibna diyaari dabbinta.

DABINTA DOONLGA WAA SHAQEYAA

Adeegso dhowr dabbin isla markii. Waxaa fiican inta badan!

- Waxaad dhigtaa meelaha aad ku aragtay doonliga waaweyn ama doonliga yaryar ama godadka meelaha laga yaabo in ay ka soo galaan dhismaha.
- Waxaad dhamaadka dabbinta, meesha ay ku taal birta fakata, u jeedisaa darbiga ama meesha uu ku ordo doonliga.
- Toosi kiciyaha dabbinta. Waxaa dhici karto in aad u baahatid in aad toosisid dareenka birta fakata. Si aad u sameysid tan, akhri tilmaamaha ku yaal baakada.
- Dabbinta waxaa kaloo dhajin karaa tubooyinka ama tiirarka marka la isticmaalo fiilooyin, masaamiir, ama muaamiirta lagu wareejiyo (screws). Waxaad duleelisaa qeybta labaad dabbinta adiga oo kala qeybiya kuna musmaara ama fiito kula dhajiya meel fidsan.
- Wad in aad diyaarisid dabbinta ilaa aad ka istaagtd qabashada doonliga.



Hubso in dabbinta loo dhigo si ay uga nabada galaan caruurta, xoolaha guri joogga ama xoolaha duur joogga oo laga yaabo in ay waxyeelo soo gaaraan.

Isticmaalka Goobaha Cantalaalka

Haddii aad isticmaashid sun si aad u kantaroooshid bahda doonliga, waa in aad raacdid tilmaamaha ku yaal calaamadda.

Sunta looguma talogelin kantaroolka doonliga weyn ee ku jira gudaha dhismooyinka. Doonliga sumaysan wuxuu ku dhiman karaa meelo adag in la gaaro taasoo kaddibna abuurto ur xun. **Mar kasta sug sunta goobaha cantalaalka si aysan u helin caruurta, xoolaha jooga guriga ama xoolaha duur jooga.**

Marka dibadda la dhigaayo cantalaalka, ka fakar in dhamaan goobaha la dhigo cantalaalka sida looxa, sida daashashka keydka iyo safafka siligga. Waa in la dhigo masaafu isu jirta ku dhawaad 50 cag agagaarka dhismooyin ama dhulka laga shaqeeyay ee ku wareegsan dhismooyinka.

Waxaad cantalaalka sunta ku dhajisaa biraha, gudaha sanduuqa cantalaalka. Tan waxay ka reebtaa doonliga in u usan cantalaal kala soo bixin sanduuqa una soo xambaarin dibadda kaddibna sunta dhigin dhulka. Dhig cantalaalka si aysan u noqonin mid la labi karo iyo la gedin karo.



Goobta Cantalaalka



Godadka Doonliga